# Xog Aruurinta Helitaanka iyo Adeegsiga Tignooloojiyada Bulshada ee Magaalada Seattle

Codkaagu waa muhiim! Waad ku mahadsan tahay buuxinta xog aruurintaan muhiimka ah ee la xariirta adeegyada tignooloojiyada iyo interneedka, caqabadaha ku gudban adeegsiga, iyo taageerada loo baahan yahay si looga caawiyo dhammaan dadka deegaanka inay helaan fursado ay u siman yihiin. Xataa haddii aad marar dhif ah isticmaasho ama aadan waligaa isticmaalin tignooloojiyada ama interneedka, fadlan intaad awoodo samee wixii karaankaaga ah si aad uga jawaabto dhammaan qaybaha xog aruurinta. Xog aruurintaan ayaa caawinaysa hagista barnaamijyada sinaanta tignooloojiyada iyo maaliyada ee dadka reer Seattle. Xogta aad bixiso waxaa loo adeegsadaa keliya xog aruurinta daraasada. Ciwaankaaga ama xog kasta oo qofka lagu aqoonsan karo ayaan la xariirin natiijooyinka xog aruurinta.

Tilmaamaha: Su'aal kasta, fadlan dooro jawaabta ugu fiican (adoo tigsaaraaya bokiska ama bokisyada) la xariira khibradaada ama fikirka.

Xog aruurintaan waxaa ku jira su'aalo kugu saabsan ka qof ahaan iyo su'aalo ku saabsan qoyskaaga (dadka aad la nooshahay). Marka aad ka jawaabayso xogta ku saabsan gurigaaga oo dhan, fadlan ka jawaab sida ugu fiican ee aad awoodo. Xog aruurintaan waa in loo buuxshaa keliya halka qoys ee helay xog aruurinta.

Fadlan ku celi xog aruurinta la buuxshay boqshada boostada lacagteeda horey loo baxshay ee la socota baakadaada xog aruurinta sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodo.

## Helitaanka Interneetka

**Su'aasha 1 aad. Qoyskaagu ma haystaa qaab uu ku helo interneed meesha aad hadda dagan tahay?**

- ❑ Haa
- ❑ Maya

**Su'aasha 2 aad. Adiga ama qof kamid ah qoyskaagu ma haystaa qaab uu ku helo interneed markuu banaanka maraayo? Tan ayaa noqon karta taleefanka gacanta oo leh khadka simikaarka ama hotspot ku xariirsan shirkadaada interneedka.**

- ❑ Interneedka simikaarka oo leh khad kooban
- ❑ Interneedka simikaarka oo leh khad aan xadidnayn
- ❑ Aad ku shubato marka aad doonto (interneedka moobilka/aan ahayn mid lacag joogto ah lagu bixiyo)
- ❑ Ma aqaano
- ❑ Ma haysto adeegga interneedka moobilka

**Su'aasha 3 aad. Xili uun kamid sanadkii lasoo dhaafay, meesha aad ku nooshahay ma noqotay interneed la'aan hal bil ama in ka badan?**

- ❑ Haa, waxay ahayd bilaa interneed hal bil ama ka badan
- ❑ Maya, waxay lahayd khad interneed joogto ah
- ❑ Ma aqaano/Ma Hubo

**Su'aasha 4 aad. Meeqa aaladood ayaad ku haysataa gurigaaga mase leedahay ama waad kiraysatay aaladaha?**

| | Mulkiyada leh | Dayn ugasoo qaatay dugsiga, shaqada, ama meel kale |
|---|---|---|
| Kumbuyuutar wayn | # ____ | # ____ |
| Kumbuyuutar laabtoob ah | # ____ | # ____ |
| Taableed (aynka ku jiraan aaladaha akhriska elektarooniga ah ee interneedka leh) | # ____ | # ____ |
| Taleefan casri ah | # ____ | # ____ |

► **HADDII AADAN INTERNEED KU HAYSAN MEESHA AAD DAGAN TAHAY:** Fadlan tag bogga 3, Su'aasha 10 aad

**Su'aasha 5 aad. Waa maxay dhammaan qaababka aad interneed ugu hesho meesha aad ku nooshahay?**

**Fadlan noosoo sheeg ku dhawaad qiimaha adeeg kasta oo interneed uga baxa qoyskaaga bil kasta. Fadlan qor "Ma aqaano" haddii aadan aqoon qiimaha.**
**Fadlan sidoo kale tig saar adeeg kasta oo aad haysato haddii uu yahay adeeg khad ku shaqeeya oo leh adeegyo ka badan interneedka (sida TV ga, wicitaanka iyo/ama fariin qoraalka, amaanka guriga, iwm.).**

| Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya. | Sida aan interneed ugu helo meesha aan daganahay | Qiyaasta Qiimaha Bishii | Kan ma ku jiraa wax ka badan interneedka? | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Qarashka $ | Haa | Maya | Ma aqaano |
| CenturyLink (Lumen) | ❑ | $ ______ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Xfinity (Comcast) | ❑ | $ ______ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Astound (horey loo oran jiray Wave) | ❑ | $ ______ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Shirkad bixisa Khadka Simikaarka/Wireless-ka (Metro by T-Mobile, AT&T, Boost, US Cellular, iwm.) Adeeg bixiyaha: ______________________ | ❑ | $ ______ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Nooc kale oo gaar ah: _______________ | ❑ | $ ______ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Wuu bixiyo dhismahaygu | ❑ | | | | |
| WiFi ama interneed kale oo bilaash ah | ❑ | | | | |
| Ma aqaano | ❑ | | | | |
| Ma haysto interneed | ❑ | | | | |

**Su'aasha 6 aad. Ilaa heer intee dhan ayuu interneedku leeyahay khad iyo xawaare ku filan meesha aad dagan tahay marka laga hadlaayo awoodaada samaynta shaqooyinka aad doonayso aadna u baahan tahay inaad ku samayso interneedka? Fadlan tig saar hal god.**

| Gebi ahaan Ku filan | Inta Badan ku Filan | Mararka qaar u filan | Inta badan aan Ku filnayn | Aan ku filnayn | Ima Qusayso |
|---|---|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 7 aad. Waa maxay xawaaraha wax kalasoo degida adeegga interneedka ee meesha aad ku nooshahay? Haddii aad haysato wax ka badan hal interneed, fadlan dooro interneedka ugu xawaaraha badan ee aad haysato. Fadlan tig saar hal god.** *Mbps = Megabits halkii ilbiriqsi*

| Ilaa 50 Mbps | Ilaa 75 Mbps | Ilaa 200 Mbps | Ilaa 1000 Mbps (1 Gigabit) | Wax ka badan 1000 Mbps (1 Gigabit) | Ma haysto interneed | Ma aqaano |
|---|---|---|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 8 aad. Intee jeer ayuu go'aa ama daciif noqdaa khadkaaga interneedku? Fadlan tig saar hal god.**

| Maalin kasta | Asbuuc kasta | Bil kasta | Wax ka Yar Hal Bil | Marna | Ma adeegsado interneedka |
|---|---|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 9 aad. Waa maxay hal wax oo kor u qaadi kara adeegga interneedkaaga meesha aad ku nooshahay? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Xawaare dheereeya
❑ Qiimo intaan kasii jaban
❑ Adeegga macaamiisha oo wanaagsan oo ay shirkadu bixiso
❑ Isku halayn wanaagsan / waqtiga hoos u dhaca oo la yareeyo
❑ Mid kale, fadlan sheeg: ___________________________
❑ Waxba
❑ Meesha aan daganahay malahan interneed

## Isticmaalka Tignooloojiyada/Aalada

**Su'aasha 10 aad. Fadlan noo sheeg meesha aad ku isticmaashay interneedka saddexdii bilood ee lasoo dhaafay. Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

| | Waxaan Interneedka Ku Isticmaalay |
|---|---|
| Guriga | ❑ |
| Shaqada | ❑ |
| Dugsiga/Kuleejka/Jaamacada | ❑ |
| Maktabada | ❑ |
| Xarunta bulshada ama nasiinada | ❑ |
| Xarunta haayad khayri ah diimeed ama dhaqan | ❑ |
| Guriga saaxiib ama qaraabada | ❑ |
| Interneed dadwayne ama bilaash ah (gegiga diyaaradaa, dhisme dadwayne) | ❑ |
| Ganacsi maxali ah (meherad kafee ama maqaayad) | ❑ |
| Xarunta/qolka kumbuyuutarka ee dhisme/guri | ❑ |
| Meelo kale | ❑ |
| Ma isticmaalo interneedka | ❑ |

**Su'aasha 11 aad. Fadlan noo sheeg haddii aad wax ka ogtahay ama aad hadda isticmaasho adeegyada soo socda ee interneedka qiimaha jaban ee qoysaska danyarta ah ee u qalma: Fadlan tigsaar mid kamid ah adeeg kasta oo interneed.**

| | | Kama warqabo arrintaan | Waan ka warqabaa laakiin hadda ma isticmaalo | Waan ka warqabaa waana isticmaalaa hadda |
|---|---|---|---|---|
| Comcast Internet Essentials (Adeegyada Aasaasiga ah ee Interneetka Comcast) | $9.95/bishii + canshuurta | ❑ | ❑ | ❑ |
| Simply Internet oo ay bixiso Astound (Wave) | $9.95/bishii + canshuurta | ❑ | ❑ | ❑ |
| Connect All (oo ay bixiso InterConnection) | $14.95/bishii (interneedka aan Xadidnaynee T-Mobile LTE Plus oo ay bixiso Mobile Citizen) | ❑ | ❑ | ❑ |
| PCs for People | Adeegyada $95 Hotspots, $15/bishii | ❑ | ❑ | ❑ |
| Lifeline Program | $9.25/bishii (waxay bixisaa qiimo dhimisyada adeegga khadka taleefanka) | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 12 aad. Ma maqashay Barnaamijka Interneedka Qiimaha jaban ee heer qaran (ACP) ee adeegga interneedka, kaasoo baxsha qiimo dhimis dhan $30 bishii yna qayb ka yihiin shirkadaha interneedka? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Ma maqan barnaamijkaan ❑ Waan ka warqabaa laakiin hadda ma isticmaalo ❑ Waan ka warqabaa waana isticmaalaa hadda

**Su'aasha 13 aad. Waa maxay sababta aadan aad ugu isticmaalin interneedka? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

- ❑ Ma aqaano sida loo isticmaalo interneedka
- ❑ Ma xiiseynaayo ama uma baahni / ma doonaayo inaan isticmaalo
- ❑ Adeegga interneedku aad ayuu qaali u yahay
- ❑ Ma haysto aalad (kumbuyuutar, taableet, taleefoon casri ah) oo aan ku isticmaalo interneetka
- ❑ Aad ayuu daciif u yahay / mooraal xumo badan / interneedku si fiican uma shaqeeyo
- ❑ Waqti uma hayo inaan wax ka ogaado ama aan isticmaalo
- ❑ Qorsheyaasha adeegga ee shirkadaha interneedku waa kuwo lagu wareeraayo
- ❑ Ma jecli inaan wax ka eego ama ka akhriyo interneedka
- ❑ Mid kale, fadlan sheeg: ______________________________
- ❑ Sabab ma leh – Horey ayaan aad ugu adeegsaday interneedka

**Su'aasha 14 aad.** **Haddii aadan haysan interneed ka shaqeeya meesha aad ku nooshahay, fadlan noo sheeg sababta. Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

- ❑ Ma aqaano sida interneed aan ugu xiro meesha aan daganahay
- ❑ Uma baahni ama ma doonaayo in interneed lagu xiro meesha aan daganahay
- ❑ Kuma kalsooni shirkadaha tignooloojiyada ama interneedka
- ❑ Ma haysto dayn ama shuruudaha lacagta hormariska ah ayaa aad u badan
- ❑ Qiimaha interneedku aad ayuu qaali u yahay
- ❑ Ma haysto aalad aan ka galo interneedka
- ❑ Adeegga interneedku aad ayuu daciif u yahay / la iskuma halayn karo
- ❑ Mid kale, fadlan sheeg: ________________________
- ❑ Meesha aan daganahay way leedahay interneed

## Adeegsiga Interneedka iyo Awooda Isticmaalka interneedka

**Su'aasha 15 aad.** **Midkee kamid ah hawlaha soo socda ayaan ku samaysay oonlaynka ugu yaraan mararka qaar intii lagu jiray lixdii bilood ee lasoo dhaafay? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

| **Shaqada** | **Haa, waan ku sameeyay tan oonlaynka** |
|---|---|
| Isticmaalka iimeelka oonlaynka ah | ❑ |
| Fariin qoraal ama fariimaha oonlaynka ah ee interneedka | ❑ |
| Isticmaalka baraha bulshada ee oonlaynka ah (Facebook, Instagram, Twitter, Tik Tok, iwm.) | ❑ |
| Ku ciyaarista gaymamka oonlaynka ah | ❑ |
| Daawashada ama dhageysiga muuqaallada, muusiga, barnaamijyada raadiyaha, ama warbaahinta oonlaynka ah | ❑ |
| Abuurista iyo baahinta xog rasmi ah (sawiro, jaantusyo, muuqaal, cod, warbixinno, iwm.) | ❑ |
| Sameynta shaqada dugsiga ama fulinta cilmi baarista dugsiga oo oonlayn ah | ❑ |
| Ka qaybgalka ama xaadirista dugsi ama tababar shaqo oo oonlayn ah | ❑ |
| Ku samaynta xariir ama shaqo oonlaynka intaan ka maqnaa goobta shaqada, sida ku shaqaynta guriga | ❑ |
| Adeegsiga interneedka si aan u raadsho ama u codsado shaqo oonlayn ah | ❑ |
| Ka gelista adeegyada dawlada oonlaynka (diiwaan gelinta codbixinta, cusbooneysiinta ruqsadaada darawalka, codsashada dheefaha dawlada, iwm.) | ❑ |
| U adeegsiga interneedka dukaamaysi oonlayn ah, qabsashada tigidhada safarka, ama adeegyada kale ee macaamiisha sida tagaasida (Uber, Lyft, etc.) | ❑ |
| U adeegsiga interneedka iibinta badeecooyinka (eBay, Etsy, Craigslist, Facebook Marketplace, iwm.) | ❑ |
| U adeegsiga interneedka si aad u iibiso adeegyadaada sida wadista tagsiga Uber ama Lyft, ku bixinta adeegyada kirada Airbnb, adeegyada talo bixinta/xirfada, iwm. | ❑ |
| Helitaanka xogta sharciga ama xuquuqda macmiilka oo oonlayn ah | ❑ |
| U adeegsiga interneedka adeegyada interneedka sida bangida, maalgashiga, bixinta biilasha oonlaynka ah, ama u dirista lacagaha dadka kale | ❑ |
| Helitaanka diiwaannada caafimaadka ama diiwaannada caymiska caafimaadka ee oonlaynka ah | ❑ |
| Ka qaybgalka balanta caafimaad ee dhakhtarka ama xirfadlaha kale ee caafimaadka ee oonlaynka ah | ❑ |
| Ka raadinta xogta caafimaadka oonlaynka (WebMD, iwm.) | ❑ |

**Su'aasha 16 aad.** **Ma heli kartaa aalad leh shaashad wayn heer ku filan inaad ku samayso dhammaan shaqooyinka aad u baahan tahay inaad samayso (tusaale ahaan, layli guri, qorista dukumiintiyada, buuxinta foomamka)?**

❑ Haa ❑ Maya

**Su'aasha 17 aad. Qanaaco intee dhan ayaad ku qabtaa fulinta shaqooyinka soo socda ee oonlaynka ah? Fadlan tigsaar hal bokis layn kasta.**

| Shaqada | Gebi ahaanba ku qanacsan samaynta arrintaan | Waan samayn karaa laakiin mararka qaar caawimaad ayaan u baahan nahay | Ma aqaano sida loo isticmaalo adeegaan |
|---|---|---|---|
| Furista baroowsarka interneedka si aad u hesho una adeegsato webseedyada | ❑ | ❑ | ❑ |
| Badelid sitinnada si aan u fududeeyo isticmaalka aaladayday (tusaale, badelida xajmiga farta si aan u fududeeyo akhriskeeda) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Si aan aalad ugu xiro khadka Wi-Fi ga | ❑ | ❑ | ❑ |
| Cabirida xawaaraha khadkaaga interneedka (hubinta xawaaraha) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Furista ciwaan iimeel ah | ❑ | ❑ | ❑ |
| La wadaagista dukumiintiyada dadka kale adoo iimeelka ku lifaaqaaya | ❑ | ❑ | ❑ |
| Ka qaybgalka shirarka fogaan aragga ah, wicitaannada, ama kulannada lagu qabto oonlaynka (tusaale, Teams, Zoom) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Wadaagista iyo wada shaqaynta ayadoo la adeegsanaayo dukumiintiyo oonlayn ah (tusaale, Google docs, Dropbox) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Gelitaanka iyo la wadaagista xogta aaladaha kaladuwan (tusaale, maaraynta kalaandarka ama nidaamka balan qabsashada adoo adeegsanaaya taleefankaaga casriga ah ama laabtoobka) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Adeegsiga aalada xog raadinta si aad u hesho xogta aad doonayso | ❑ | ❑ | ❑ |
| Adeegsiga kaararka daynta/baanka ama foomamka kale ee lacag bixinta oonlaynka ah (tusaale PayPal, Venmo) si aad u iibsato badeecooyinka/adeegyada oonlaynka ah | ❑ | ❑ | ❑ |
| Soo degsashada iyo adeegsiga ab cusub oo aan ku shubayno taleefankeena, taableedka ama laabtoobka | ❑ | ❑ | ❑ |
| U adeegsiga webchat si aad u hesho adeegga macaamiisha ama aad xal ugu hesho dhibaatooyinka | ❑ | ❑ | ❑ |
| U adeegsiga interneedka helitaanka xog kaa caawinaysa xalinta caqabadaha | ❑ | ❑ | ❑ |
| Aqoonsiga nooca xogta ama mawduuca la aamino karo, ama aan la aamini kari, ee ku jira webseedyada/ababka | ❑ | ❑ | ❑ |
| Rakibaada iyo badelida baasaweerada si ay kaaga caawiyaan ilaalinta badqabka xogtaada iyo akoonadaada | ❑ | ❑ | ❑ |
| Aqoonsiga iyo iska ilaalinta lifaaqyada laga shakiyay ee ku jira iimeellada, webseedyada, baraha bulshada, iyo fariimaha qoraalka ah | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 18 aad. Xad intee dhan ayaad ku tiirsan tahay dadka kale si ay kaaga caawiyaan xirfadaha loo baahan yahay si aad u gasho una adeegsato interneedka? Fadlan tig saar hal god.**

❑ In badan ayaan ku tiirsanahay qof kale
❑ Marar dhif ah ayaan ku tiirsanahay qof kale
❑ Marna ma adeegsado interneedka
❑ Xoogaa ayaan ku tiirsanahay qof kale
❑ Kuma tiirsani qof kale

**Su'aasha 19 aad. Fadlan qiimee xiisaha aad u qabto in adiga ama qof qoyskaaga kamid ah uu ka qaybgalo mid kasta oo kamid ah mawduucyada soo socda ee tababarka tignoolоojiyada. Fadlan tigsaar hal bokis qayb kasta.**

| **Xiiso ku aadan tababarka tignooloojiyada ee mawduucyada soo socda:** | Si Aad Iyo Aad Ah | Laga yaabo inaan xiiseynaayo | Ma xiiseynaayo |
|---|---|---|---|
| Furashada / Isticmaalka baraha bulshada | ❑ | ❑ | ❑ |
| Furashada / Adeegsiga Iimeylka | ❑ | ❑ | ❑ |
| Raadinta shaqo iyo codsiyada shaqada oonlaynka ah | ❑ | ❑ | ❑ |
| Adeegsiga software aasaasi ah (tusaale, aalada word, aaladaha spreadsheet) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Barashada sida loo qoro koodhka softiweerka iyo Ablikeeshinada | ❑ | ❑ | ❑ |
| Barashada abuurista, wax ka badelka, iyo daabicida shaqadayda | ❑ | ❑ | ❑ |
| Cilad bixinta hardware-ka kumbuyuutarka ama aalada moobilka | ❑ | ❑ | ❑ |
| Ka difaacida naftaada iyo xogtaada oonlaynka ah | ❑ | ❑ | ❑ |
| Barashada sida badeecooyinka iyo adeegga loogu iibsho oonlaynka | ❑ | ❑ | ❑ |
| Abuurista nuqulka ama kaydka faylashaada (ku jira fayl xanbaar ama aalad kayd ah) | ❑ | ❑ | ❑ |
| Wax kale (qor mawduucyadaada tababarka): ________________________________ | | | |

## Fikradaha Ku aadan Interneedka iyo Tignooloojiyada

**Su'aasha 20 aad. Muhiimad intee dhan ayay tignooloojiyada iyo interneedku u leeyihiin nolol maalmeedkaaga? Fadlan tig saar hal god.**

| Aad iyo aad Muhiim u ah | Aad muhiim u ah | Muhiim ah | Aad Muhiim uma ahan | Muhiim Maaha |
|---|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 21 aad. Ilaa heer intee dhan ayaad ogoshahay ama diidan tahay mid kasta oo kamid ah jumlada soo socota? Fadlan tigsaar hal bokis jumlad kasta.**

| | Aad ayaan u Ogolahay | Xoogaa waan Ogolahay | Dhexdhexaad | Xoogaa waan Diidanahay | Si xoogan ayaan u diidanahay |
|---|---|---|---|---|---|
| Aad ayaan ugu kalsoonahay adeegsiga kumbuyuutarada, taleefannada casriga ah, iyo aaladaha kale ee tignooloojiyada si aan u galo interneedka | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Waa igu adag tahay inaan ogaado inaan isku halayn karo xogta aan ka helo interneedka iyo in kale | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Aad ayaan u aqaanaa tignooloojiyada iyo interneedka | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Way igu adag tahay inaan barto sida loo isticmaalo aaladaha cusub ee tignooloojiyada iyo barnaamijyada sofrware-ka | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Tignooloojiyadu waxay ii sahlaysaa inaan maamulo nolol maalmeedkayga | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Kalsooni kuma qabo inaan ganacsi ku sameeyo meel aan lahayn khadka interneedka | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Waxaan u baqayaa sirta iyo in xogta aan ku diro interneedka ay arki doonaan dad kale | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Marka laga hadlaayo tignooloojiyada, waxaan door bidiayaa in qaabka ugu fudud marka loo eego kuwa leh qaybaha badan | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Waxaan ka walwalaa inaan awoodi waayo kharashka aaladaha kumbuyuutarka maadaama tignooloojiyadu ay isbadel iyo hormar samaynayso | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 22 aad. Midkee kamid ah waxyaabaha soo socda ayaa ah walaacyo aad qabto marka laga hadlaayo gelitaanka iyo adeegsiga interneedka:**
**Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

- ❑ Sida xogtayda iyo macluumaadka loo adeegsado (ayna ku jiraan qaababka laga yaabo inaadan aqoon)
- ❑ Xaqiijinta badqabka iyo amaanka xogtayda gaarka ah (sida xogta baanka iyo caafimaadka)
- ❑ Ka ilaalinta naftayda dadka kale ee ku jira oonlaynka (dabagalka oonlaynka, weerarada oonlaynka)
- ❑ Ka ilaalinta carruurtayda dadka kale ee ku jira oonlaynka (dabagalka oonlaynka, weerarada oonlaynka)
- ❑ Ka ilaalinta kumbuyuutarkayga fayrasyada iyo weerarada fayraska loo adeegsado
- ❑ Midkoodna kuwaan maaha walaac aan qabo

**Su'aasha 23 aad. Waa maxay saamaynta aad aaminsan tahay in intereedka iyo tignooloojiyadu ku leeyihiin bulshada? Fadlan tig saar hal god.**

| Saamayn gebi ahaanba Faa'iido leh ama Wanaagsan | Saamayn Inta badan Faa'iido leh ama Wanaagsan | Labadaba Faa'iido iyo Khasaaro leh | Inta Badan Khasaaro badan | Gebi ahaanba Khasaaro weeye |
|---|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

## Hawlgelinta Dadweynaha

**Su'aasha 24 aad. Intee jeer ayaad booqataa Webseedka Magaalada Seattle (seattle.gov)? Fadlan tig saar hal god.**

| Ugu Yaraan Asbuuciiba Mar | 2-3 Jeer Bishii | Halmar Bishii ama Kayar | Marna |
|---|---|---|---|
| ❑ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 25 aad. Ma ka qaybgashaa nooc uun kamid ah kooxda bulshada sida ururka xaafada, ilaallada dhismaha, dugsiga, koox diimeed, ama koox nooc kale ah? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Haa ❑ Maya ❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 26 aad. Waa maxay qaababka aad jeceshahay inaad dadka kula xariirto marka laga hadlaayo helista xogta ama bixinta fikir ku aadan koox bulsho ama Magaalada Seattle? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

❑ Kulan bulsho
❑ Waraaq Xaashi ah / boosto
❑ Wicitaanada Taleefanka
❑ Fariin qoraal
❑ Iimayl
❑ Baraha Bulshada (Facebook, Twitter, iwm.)
❑ Qoraal gaar ah ama bulsho
❑ Webseedka / Abka Magaalada Seattle
❑ Inaan toos u geeyo xafiisyada magaallada
❑ Mid kale, fadlan sheeg: ______________________________
❑ Midna / ma doonaayo inaan cid la xariiro

## Xog ku Saabsan Qoyskaaga

**Su'aalahaan ayaa lagu waydiinayaa si aan u fahanno dhacdooyinka la xariira noocyada kaladuwan ee qoysask Seattle.**
**Jawaabahaaga laguma aqoonsan doona adiga ama qoyskaaga si gaar ah.**

**Su'aasha 27 aad. Meeqa carruur iyo dadka waawayn ah ayaa ku nool gurigaaga? Dadka guriga waa koox dad ah oo isla nool oo wadaaga lacag xataa haddii aysan isla dhalan.**

| | |
|---|---|
| **Tirada carruurta (kayar 18) ee ku nool gurigaaga** | # _______ |
| **Tirada dadaka waawayn (kawayn 18-59) ee ku nool gurigaaga** | # _______ |
| **Tirada dadka qaangaarka ah ee 60 sano jir ama ka wayn ah ee gurigaaga ku nool** | # _______ |

**Su'aasha 28 aad. Meeqa carruur ah (oo kayar 18) oo ku nool gurigaaga ayaa ku jira mid kasta oo kamid ah kooxaha soo socda ee da'da ama fasalka? Fadlan sidoo kale noo sheeg meesha ilmo kasta ka dhigto dugsiga (haddii carruurtu ay dhigtaan dugsi). Fadlan qor tirada carruurta qayb kasta oo tigsaar nooca dugsiga ee ilmo kasta.**

| | | **Fadlan sheeg nooca dugsiga ee da' kasta/heer fasal kasta:** | | |
|---|---|---|---|---|
| | Tirada Carruurta | Seattle Public Schools (Dugsiyada Dadwaynaha ee Seattle) | Dugsi kale oo Dadwayne, Gaar loo leeyahay, ama Guriga wax lagu baro | Dugsi Ma dhigtaan Hadda |
| Dhalashada ilaa 3 sanno jir | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Barbaarinta ilaa Fasalka Birimada | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Fasalka 1aad ilaa Fasalka 5aad | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Fasalka 6aad ilaa fasalka 8aad | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Fasalka 9aad ilaa fasalka 12aad | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |
| Kuleej / waxbarasho jaamacadeed | ____ | ❑ | ❑ | ❑ |

**Su'aasha 29 aad. Meeqo sano ayaad jirtaa?** _______________

**Su'aasha 30 aad. Lab miyaa tahay mise dhadig? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

❑ Dhadig ❑ Lab ❑ Labeebshe ama aan lahayn jinsi gaar ah
❑ Waxaan doorbidayaa inaan is qeexo: _______________ ❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 31 aad. Waa maxay qiyaasta wadarta guud ee dakhliga soo gala qoyskaaga kahor canshuuraha? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Wax ka yar $20,000
❑ $20,000 - $26,999
❑ $27,000 - $36,999
❑ $37,000 - $45,999
❑ $46,000 - $54,999
❑ $55,000 - $64,999
❑ $65,000 - $73,999
❑ $74,000 - $83,999
❑ $84,000 - $92,999
❑ $93,000 - $99,999
❑ $100,000 - $124,999
❑ $125,000 - $149,999
❑ $150,000 - $199,999
❑ $200,000 - $249,999
❑ $250,000 ama ka badan
❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 32 aad. Ma tahay Hispanic, Latino ama qof kasoo jeeda Isbaanish? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Haa ❑ Maya ❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 33 aad. Isirkee / qowmiyadee ayaad ka tirsan tahay? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

❑ Aasiyaan
❑ Madoow ama African Ameerikaan / Asal Afrikaan
❑ Qof Bariga Dhexe kayimid
❑ Ameerikaan Dhalad ah ama Alaska Dhalad ah
❑ Hawaii Dhalad ah / U dhashaha Jasiirada Pacific
❑ Caddaan
❑ Mid kale, fadlan sheeg: ____________________
❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 34 aad. Midkee kamid ah kuwa soo socda ayaa ah kan ugu habboon ee Waqti xaadirkaan qeexaaya xaaladadaada guriga? Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

❑ Anaa guriga leh
❑ Kiro
❑ Guri aan sugnayn (guri ku meel gaar ah)
❑ Guri kooxeed
❑ Hooy la'aan / Aan guri haysan
❑ Mid kale, fadlan sheeg: ________________
❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 35 aad. Waa maxay nooca guriga ugu habboon ee qeexaaya meesha aad hadda dagan tahay? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Guriga halka qoys
❑ Guri labo qaybood / sadex qayb / dabaq ku yaala/ filo ah
►Tirada guryaha dhismaha ku yaala? ❑ Kayar da'da 4 ❑ 4-20 guri ❑ In kabadan 20 ❑ Ma aqaano
❑ Mid kale, fadlan sheeg: ______________________________

**Su'aasha 36 aad. Ma tahay... Fadlan tigsaar dhammaan jawaabaha khuseeya.**

❑ Shaqo buuxda haysta
❑ Maalin nuskeed shaqeeya
❑ Iskii u shaqaysta
❑ Ma shaqeeyo
❑ Hawlgab ah
❑ Arday
❑ Guri ilaaliye/Aan ka shaqayn banaanka guriga
❑ Mid kale, fadlan sheeg: __________________

**Su'aasha 37 aad. Hadda ma raadinaysaa shaqo? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Haa ❑ Maya ❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 38 aad. Waa maxay luuqada looga hadlo inta badan meesha aad dagan tahay? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Ingiriis
❑ Isbaanish
❑ Cantonese
❑ Mandarin
❑ Af-Soomaali
❑ Amxaari
❑ Vietnamese
❑ Tagalog
❑ Korean
❑ Mid kale, fadlan sheeg: __________________
❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 39 aad. Adiga, ama qof kamid ah qoyskaaga, ma qabaa xanuun, xaalad jireed, ama naafo ku adkaynaysa adeegsiga tignooloojiyada ama interneedka ayadoo aan la caawin ama wax laga badelin? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Haa ❑ Maya ❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Su'aasha 40 aad. Waa maxay heerka ugu sareeya ee waxbarashadaada? Fadlan tig saar hal god.**

❑ Dugsi dhexe ama qayb kamid ah dugsiga sare
❑ Shahaadada dugsiga sare / shahaadada GED
❑ Qayb kamid ah kuleejka, farsamo, ama dugsiga tababarka shaqada
❑ Shahaadada kuleejka oo labo sano ah / shahaado kuleej
❑ Shahaado kuleej oo afar sano ah / Shahaadada koobaad ee jaamacada
❑ Qayb kamid ah shahaadada labaad ee jaamacada
❑ Shahaadada heerka labaad ama shahaado xirfadeed
❑ Waxaan doorbidayaa in aanan ka jawaabin

**Waad ku mahadsantahay jawaabahaaga**